



Xafiiska Guddoomiyaha - Office of the Speaker

Line: +252-513503

(Hargeisa - Somaliland)

E-mail: speakersomalilandparliament@gmail.com

Ref: GW/K/12/66/2026

Date: 17/02/2026

Ku: Dhammaan Guddoomiyaasha Guddiyada Golaha Wakiillada = Golaha=
Og: Guddida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Wakiillada = Golaha=
Og: Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL = Golaha=
Og: Guddoomiye ku-xigeenka 2^{aad} ee Golaha Wakiillada JSL = Golaha=

Ujeedo: Wargalin.

Sida ku cad Qodobka 54^{aad} Faqradiisa 2^{aad} ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada JSL waxa Shaqada iyo Hawlaha Golaha sii wadi doonta Guddida Joogtada iyo Anshaxa oo kaliya mudada lagu jiro fasaxa.

Haddaba, iyadoo la dhawrayo wada shaqeynta Guddiyada Golaha oo la raacayo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada waa in aanay Guddiyada Goluhu samayn karin wax kulamo yeedhmo ah, marka laga reebo Guddida Joogtada iyo Anshax Golaha Wakiillada laga bilaabo Maalinta Arbacada ee Taariikhdu tahay 18/02/2026.

Sidaa darteed, waxaa mas'uuliyadda Yeedhmada ee mas'uuliyiinta Qaranka, Kormeerka iyo Booqashooyinka iyo u kuur galka halwaha Qaranka iyo Xog-warankooda u gaar tahay Guddida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Wakiillada mudadda fasaxa ee Golaha si wafaqsan Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada JSL.

ALLAH MAHAD LEH

Md Siciid Mire Faarax (Giire)
Guddoomiye ku-xigeenka 1^{aad} ahna Ku-simaha
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL.

